

Janaayo 31, 2017

Gacaliyayaal Ardayda Highline College,

Sida la fahmi karo, iftiinka dhacdooyinka qaran ee dhawaanahan, qaar idinka mida ayaa laga yaabaa inay ka walwalsanaayeen wax ku saabsan saamaynta jirta ee isbeddelka lagu sameeyay siyaasadda arrimaha socdaalka ee federaalka, oo ay ku jiraan dabcinta DACA (Talaabada Dib u dhigista Dadka Carruurnimadoodii Yimid) iyo DAPA (Talaabada Dib-u-dhigista Waalidiinta Aameerikaanka) ee amarada fulinta. Wax badan, wararka wiikendkii la soodhaafay waxay u adeegeen inay kordhiyaan tabashooyinkan.

Waqtigana aan la hubin, waxaanu rabnaa inaanu xaqiijino taageeradeena aan ugu talogalnay dhammaan ardaydeena, qoysaskooda bulshooyinka. Degmada South King waxay hoy utahay kala duwanaan weyn oo ah dhinaca luqadaha, qoomiyadahaha, qaramada asalka u ah, iyo dhaqanka diimaha. Waxan aaminsanahay kala duwanaantu inay taahay hantida ugu weyn ee gobolkeena. Fadlan u tixgeli iimaylkan inuu yahay dib u ballan qaadista qiyamka Highline ee ka midnoqoshada iyo sinaanta guud ahaan bulshooyinka.

Intaa waxa dheer dib u caddaynta xoogan ee qiyamkeena, waxan sidoo kale rabnaa inaanu ku siino macluumaad.

Fulinta siyaasadda muhaajirnimadu waa mas'uuliyadda dawladda federaalka, ma aha saraakiisha kambaska. Ardayda, taas macnaheedu waay:

- Saraakiisha Ammaanka Dadweynaha ee Highline marnaba ma waydiin doonaan ardada wax ku saabsan xaaladooda muhaajirnimada ama kama qaybqaadan doonaan taabbooyin fulineed ee arrimo socdaal oo kasta.
- Waxaan sii wadi doonaa ilaalinta xogta waxbarasho ee ardayda si sharciga gaarahaanshaha ee federaalka farayo.
- Marka aanan ka leexin karin saaraakiisha laanta socdaalka ee federaalka kambaskeena, shaqaalaheenu waxay sii wadi doonaan inay waydiiyaan codsi maxkamadeed, amar maxkamadeed, ama oggolaansho sharci ah oo kale kahor intaan la siidayn xogta gaarka ah ee arday kasta.
- Waxan sii wadi doonaa inaan maamuusno barnaamijyada gobolka Washington — sida WAFSA iyo HB 1079 — kaas oo maamula kharashka waxbarasho, galitaanka, iyo gargaarada waxbarasho, sida ay qortay sharci dejintu.

Highline College waxa ka go'an inay siiso dhammaan ardayda jawi ammaan ah oo soo dhawayn leh. Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad ka warbixiso wax kasta oo dhibaata ah, xoogsheegasho ah, ama hanjabaad ku salaysan xaalad muhaajirnimada, diin ama qaran asal u ah. Dhaqanka noocan ah looguma dulqaadan karo kambaska Highline ama fasaladeena waxayna xadgudub ku tahay Xeerka Fulinta Ardayga ama siyaasadda dhib la'aanta.

Midnimada, Kuliyadda Highline waxa ay ku faraxsantahay inay ku biirto dhaqdhaqaaqa qaran ee kuliyadaha iyo jaamacaduhu uga soo horgeedaan isbeddelada lagu samaynayo siyaasadaha soo galootiga taas oo hanjabaad u noqon karta xubno kamida ardaydeena. Waxaan sidoo kale sii wadi doonaa inaan hawl galno ururda maxaliga ah ee bixiya adeegayda la xidhiidha soogalootiga ee bulshadeena.

Inkasta oo aannu sii wadayno la socoshada siyaasadda deegaan ahaan, goboleed, iyo qaran ahaanba, waxan samayn doonaa sida ugu fiican inaan uga jawaabno su'aalaha laga yaabo inaad qabto ee ku saabsan sida isbeddelada lagu sameeyay siyaasadda soogalootigu ay u saamayn karto adiga ama qorshayasha waxbarasho ee qoyskaaga. Si taasi loo gaaro, waxaan ka shaqaynaynaa si loo horumariyo khayraadka bangi lagu ururiyo macluumaadka noocaas ah, iyo tixraacyada arrimahan. Waxa laga heli karaa libguides.highline.edu/immigrationresource.

Jeff Wagnitz

Ku-simaha Madaxweynaha

